



King County

Miisaaniyada Lasoo jeediyay 2023-2024

CADDAALADA IYO BADQABKA

Miisaaniyada 2023-2024 waxay ka shaqayn doontaa yareynta dembiyada, rabshadaha hubka, iyo dhibaatooyinka caafimaadka hab dhaqanka la xariira iyadoo wax laga qabanaayo sababaha asaasiga ah ee keena, maalgelinta barnaamijyada caddaynta ku salaysan ee bixiya isla xisaabtanka ku saleysan bulshada, iyo hoos u dhigida farqiga jinsiyadeed iyo kan qowmiyadeed ee nidaamka sharciga dembiyada. Maalgelinada Muhiimka ah waxaa kamid ah:

Keenista shabakad qaabilسان badqabka dadwaynaha oo si wanaagsan loo tababaray

- **Kahortaga Rabshadaha ka dhasha Hubka:** \$9 milyan oo lagu taageeraayo Regional Peacekeepers Collective (nabad-ilaaliyaasha Deegaanka ee Isku dhafka ah) ee 52, Ergo la aamini karo oo gudbinaaya habka ay bulshadu hoggaaminayo oo lagaga hortagayo rabshadaha ka dhasha hubka oo ay kujiraan ka jawaab celinta dhacdooyinka muhiimka ah, gudbinta ku saleysan isbitaalka, iyo hawlaho dib u habeynta meelaha kulul.
- **Kordhintaa jawaab celinada uu sameeyo Sheriff's Office (Xafiiska Booliska) ee dembiyada rabshadaha wata:** \$2.3 milyan oo loogu talagalay in lagu abuuro unug cusub oo diirada saaraya dhimista rabshadaha hubka la xariira iyo in la shaqaaleysiyo baarayaal dheeraad ah oo la geynaayo qaypta dambiyada waaweyn.
- **Xaqijinta badqabka rakaabka gaadiidka iyo shaqaalaha:** \$21 milyan oo loogu talagalay in lagu taageero 140 kamid ah saraakiisha ammaanka gaadiidka Metro ee bixiya taageerada iyo badqabka basaska Metro, xarumaha gaadiidka, iyo sidoo kale boostooyinka gaadiidka. \$5.1 milyan oo dheeraad ah ayaa lagu taageeri doonaa Hindisaha Dib u habaynta Metro SaFE, oo ay kujirto iskaashi cusub oo lala yeelanaayo Department of Community and Human Services (Waaxda Adeegyada Dadwaynaha iyo Bulshada) iyo ururada bulshada si dadka dhibaataysan ee ku sugaran xarumaha gaadiidka Metro iyo meelaha u dhaw loogu xiro ilaha iyo adeegyada.
- **Kordhintaa tababarka kahortaga cunsuriyada ee lagula dhaqmo shaqaalaha badqabka ee safka hore:** \$1 milyan oo loogu talagalay in lagu hubiyo ku xigeenada saraakiisha, sixida asluubta saraakiisha, iyo shaqaalaha District Court (Maxkamada Degmada) si ay u helaan tababarka kahortaga cunsuriyada. Intaas waxaa sii dheer, ku xigeennada Saraakiisha waxay heli doonaan tababarro kor u qaadaya iyo dhanka kale saraakiisha asluubta waxay heli doonaan tababarro ka hortagaya is-miidaaminta oo ka sarreeya tababarada ay dowladu u xilsartay.
- **Isku dubaridka dhakaatiirta caafimaadka hab dhaqanka iyo fulinta sharciga:** \$2.1 milyan oo loogu talagalay si loo bilaabo unugyo cusub oo ka qaybqaadanaya jawaab celinada laga bixinayo xirfadlayaasha caafimaadka hab dhaqanka si wax looga qabto dhibaatooyinka ayadoo lagu dabaqayo sharci fulinta. Balaarintaan nidaamkan waxay u sahlaysaa Sheriff's Office xafiiska booliska inuu helo dad kala jawaaba qayb kasta oo dhibaatooyinka kamid ah. .

Bixinta barnaamijyada wareejinta iyo ka hortaga ee lagu saleeyo xogaha ka jawaabayaa baahiyaha bulshada

- **Kordhintaa taageerada ku saleysan Badqabka loo maro qaababka caanka ah:** \$2.4 milyan oo loogu talagalay si loogu maalgeliyo barnaamij Vital ee taageera 80 qof oo si joogta ah uga faa'iidaysta xabsiga iyagoo wax ka qabanaya guriyahooda hoose, caafimaadkooda, iyo baahiyaha kale ee aasaasiga ah ee ay qabaan, khalkhal gelinaaya arrimaha la xariira dambiyada.
- **Taageerida Community Diversion Program (Barnaamijka Weecinta Bulshada):** \$9.2 milyan oo loogu talagalay in loogu adeego 2000 marka koowaad, kiisaska dambiyada aan rabshadaha la xariirin oo ay sameeyeen dad qaangaar ah iyadoo loo marayo adeegyo bulshada ee ujeedadu tahay in looga hortago dabeecadaha dembiyada mustaqbalka, hagaajinta natiijooyinka dhinacyada waxyeelada, iyo hoos u dhigista sinaanta dadka kala jinsiyadaha duwan.
- **Sii wadida Barnaamijka Restorative Community Pathways (Dib usoo celinta Dariiqooyinka Guulaha Bulshada):** \$7.3 milyan oo loogu talagalay in lagu bixiyo la xisaabtanka ku salaysan bulshada iyo adeegyada 850 dhallinyaro ah iyadoo loo sii maraayo Restorative Community Pathways (Dib usoo celinta Dariiqooyinka Guulaha Bulshada), barnaamij caddayn ku salaysan oo yareeya dib u soo celinta oo caawiya wax ka qabashada baahiyaha hoose ee ka qaybgalayaasha.



King County

Miisaaniyada Lasoo jeediyay 2023-2024

Kor u qaadista helitaanka caddaaladda iyo soo celinta kalsoonida nidaamka badqabka dadweynaha

- **Si buuxda u maalgelinta barnaamijka baarista:** \$4.8 milyan si loogu oggolaado barnaamijka baaritaanka inuu ka shaqeeyo dib u dhaca kiisaska loona yareeyo waqtiyada ay sugayaan qoysaska ku lugta leh. Codsiyada ayaa bixinaaya daahfurnaan ku saabsan faahfaahinta la xariirta dhimashada ka timaada hawlgalada fulinta sharciga iyo fursad lagu aqoonsado waxbarashada kahortagi karta masiibooyinka la midka ah inta lagu jiro mustaqbalka.
- **Wax ka qabashada dib u dhacyada kiisaska la xariira nidaamka sharciga:** \$22.4 milyan oo ah lacagta American Rescue Plan (Qorshaha Samata-bixinta Mareykanka) si loo sii wado ka shaqeynta dib u dhacyada nidaamka sharciga ee masiibada ee abuurmay.
- **Hirgelinta kaamirooyinka jirka lagu xirto:** \$5 milyan oo loogu talagalay in la siiyo dhammaan ku xigeennada saraakiisha sameeya roondada si ay u xirtaan kaamirooyinka jirka lagu xirto. Hirgelinta kaamirooyinka iyo tababarada la xiriira ayaa isla markiiba bilaaban doona waxaana la guda geli doonaa saddexda sano ee soo socota.
- **Meesha ka saarista dembiyada daroogada:** \$2 milyan oo loogu talagalay in la siiyo kooxaha bulshada si loo dhiso wacyigelin ku saabsan fursadaha meesha looga saaraayo dembiyada daroogada ee hadda sharcidarrada ah iyo bixinta adeegyo wax ka qabta baahiyaha shakhsiyadka ay saameeyeen iyo cawaqaqib xumada ka dhalanaysa ee xariirka la leh nidaamka dembiyada iyo xukunada daroogada, sida caqabadaha joogtada ah ee la xariira guryaha iyo shaqada.

Kor u qaadista xaaladaha dadka xabsiga kujira

- **Kordhintaa barnaamijada daaweynta ee loogu talagalay dadka kujira ama laga siidaayo xabsiyada King County:** \$6.3 milyan oo loogu talagalay in la joogteeyo laguna balaariyo barnaamijada iyo adeegyada daaweynta opioid ku salaysan ee la siiyo dadka xabsiga laga sii daayo ee leh la qabsashada isticmaalka daroogooyinka ama xaaladaha kale ee caafimaadka habdhaqanka la xariira.
- **Kordhintaa helitaanka isgaarsiinta iyo agabka waxbarashada iyadoo loo marayo bixinta kaniiniyo:** \$800,000 oo loogu talagalau in lagu bixiyo kaniiniyada dadka lagu hayo xabsiyada King County si loo kor loogu qaado marin u helka qoyska ama kuwa kale ee xabsiga ka baxsan, ilaha waxbarashada, buugaagtta, bandhigiyada, agab diimeed iyo arrimaha la xariira ruuxnimada, cilmi baarisyada sharciga ah, iyo qaar kale oo badan.
- **Hoos u dhigida khatarta la xariirta is-dilka iyo kor u qaadista badqabka:** \$ 1 milyan oo loogu talagalay sidii meesha looga saari lahaa cabaqadaha ka dhasha xabsiga, oo dhistay \$940,000 maaliyad ka hor si dib loogu habbeeyo dhammaan xabsiyada si loo yareeyo khatarta dadka xabsiga ku jira.

Su'aalo ma qabtaa? La xariir kceexec@kingcounty.gov.